



Community First Choice

## Ku Saabsan Adeegyada CFC

Adeegyada lagu qorey halkan waxaa laga bixiyaa Barnaamijka Doorashada Koowaad ee Bulshada (CFC) ee loogu talagalay macamiisha u qalma.

# Doorashada Koowaad ee Bulshada Ikhtiyaarada Adeegga

## Daryeelka Shakhsiga

Adeegaha daryeelka shakhsiga ah waxay bixiyaan caawimaad leh hawlo maalinle ah sida u qubeynta, u lebisida, ama maareynta daawadaada. Haddii aad tahay qof u qalma, waxaad dooranaysaa daryeela u qalma. DSHS ayaa waxaa ay bixisaa lacagaha ku baxa baaritaanada asalka iyo tababar daryeelaha aasaasiga ah ee la siiyo dhammaan daryeel bixiyayaasha u qalma.

Waxaad ku heli kartaa adeegyada daryeelka shakhsi ee gurigaaga ama bulshadaada, haddii aad ku nooshahay:

- ✓ Gurigaaga
- ✓ Guriga qoys Qof Weyn
- ✓ Xarunta lagu xanaaneeyo waayeelada

## Tababarka Maamulka Daryeel bixiyaha

Daryeel Bixiyahaaga lacagta la siiyo waa qayb muhiim ah oo ka mid ah kooxdaada taageerada. Waxaad maareysaa hawl maalmeedka daryeel bixiyahaaga. Tababarka ayaa la heli karaa oo kuu sharxaya sida loo doorto, maamulo, oo loo buriyo daryeel bixiyayaasha.

## Daryeelka Gargaarka

Daryeel bixiyaha gargaarka ah ayaa waxaa loo isticmaali karaa in la siiyo daryeel bixiyahaaga joogtada ahi nasasho, ama in uu beddelo haddii daryeel bixiyahaaga joogtadi ahi uu xanuunsan yahay ama uusan joogin. Adiga ayaa xadidaya inta saacadood ee daryeelkaaga shakhsiyeed ee la oggolaaday aad doonaysid in daryeel-bixiyahaaga gargaarka uu shaqeeyo.

## Tababarka Hanashada Xirfadaha

Waxaad helayasaa tababar si aad u noqotid qof inbaddan isku tiirsan asaga oo qabsada hawlahaaga daryeelka shakhsiyeed ee maalin laha ah. Waxaad u adeegsan kartaa saacadaha daryeelkaaga shaqsi ama lacagtaada xaddidan ee sanadlaha ah ee sannad maaliyadeedka dowladda in aad ku iibsato Tababarka Hanashada Xirfadaha. Tani waxaa ay u oggolaanaysaa daryeel-bixiyaha in uu ku barro sida loo sameeyo hawlaha daryeelka shaqsi. Daryeel-bixiyahaaga ee aad lacagta siiyo waxaa uu kugu caawin karaa hawlahaan soo socda:

- Wax-kariska iyo diyaarinta cuntada
- Dukaamaysiga
- Hawlaha maamul hawl-guriyeedka
- Dhar-dhaqaalka
- Qubeyska (ka reebban hawlo kastoo wareejin ah)
- Dhar-xirasho
- Adeegsiga shiir-dhawrka
- Dhaqista gacamaha iyo wejiga
- Dhaqidda, shanleynta, qaabeynta timaha
- Adeegsiga waxyaabaha la isku qurxiyo
- Ku xiirashada makiinada lagu xiirto ee korantada
- Cadaysashada ilkaha ama daryeelka ilkaha gacan ku sameyska ah
- Daryeelka caadada



## Tiknoolajiyadda Caawimaada ah

Tiknoolajiyadda caawimaada leh, oo ay ku jiraan qalabka iyo agabka kale, waxay kugu caawin doontaa in aad ka soo baxdid hawlaha adiga oo aan ka helin caawimaad qof kale ama si aad u ahaatid qof inbaddan isaga isku filan oo qabsada hawlo maalinmeedka.

Si aad u hesho tiknoolajiyadda caawimaada leh, waxaad u baahan karaa talo xirfadeed oo ku saabsan shayga kuu wanaagsan si aad u kordhiso madax-bannaanidaada. Xirfadlaha wuxuu kuu soo jeedin doonaa tiknoolajiyadda saxda ah wuxuuna kugu caawin karaa in aad barato sida loo isticmaalo. Tiknoolajiyadda caawimaada leh waxaa la soo iibsadaa ayada oo la isticmaalayo lacagtaada xaddidan ee sanadlaha ah ee sannad maaliyadeedka dowladda.



## Nidaamka Jawaab celinta Degdega Shakhsiga ah (PERS)

Nidaamka Jawaab celinta Degdega Shakhsiga ah waa qalab elaktaroonig ah midkaas oo aad xiratid waxaana lagu xiriiriyaa tooska telefoonkaaga gacanta, midkaas oo kuu oggolaada in aad caawimaad u heshid si deg-deg ah. Marka uu shaqeeyo, shaqaalaha jooga xarunta jawaab celinta ayaa raaci doona tilmaamaha aad bixisay si ay ugu wacaan caawimaad.

Intaas waxaa sii dheer, adeegyada lagu daro ayaa la heli karaa si Nidaamka Jawaab celinta Degdegga Shakhsiga ah loogu qalabeeyo qalabka ogaanshaha dhicidda, meeleeeyaha GPS, ama nidaamka maamulida daawada.

Maamulayaasha kiiskaaga ayaa kugu caawin doona in aad go'aamiso haddii aad u qalantid nidaamyadan.

Haddii aad u qalantid adeegga, qaybta Nidaamka Jawaab celinta Degdega Shakhsiga ah ee caadiga ah ayaa lagu soo darayaa xirmadaada dheefta Doorashada Koowaad ee Bulshada. Adeegyada lagu daro waxaa laga qaadanaa lacagtaada xaddidan ee sanadlaha ah ee sannad maaliyadeedka dowladda.

## Adeegyada Kala-guurka Bulshada

Adeegyada Kala-guurka Bulshada ayaa waxaa ay kugu caawin karaan in aad ka guurtid goobta lagu dhigay oo aadna u wareegtid bulshada. Waxaad dooran kartaa in aad u guurtid gurigaaga, guriga qoyska qof weyn ama xarun lagu xanaaneeyo waayeelada oo leh taageero.



Si aad u codsato adeegyo, la xiriir maamulahaaga kiiska ee DDA. Haddii aadan hadda qaadnin adeeg lacagtiisa la bixiyo waxaad waci kartaa xafiiska degaanka ama booqo [www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request](http://www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request).